COVID-19 VACCINATION

LET'S DO THIS – Somali

NSW GOVERNMENT

Tallaalka COVID-19 ee carruurta jirta (5-11 sanno) loogu talagalay

HADDA BALLANSO

Waa maxay sababta carruurta jirta 5-11 sanno looga tallaalayo COVID-19?

COVID-19 waa fayras sababi kara dhimasho iyo jiro daran, iyo sidoo kale arimo caafimaad oo wakhti dheera leh. Wuxuuna dadka ugu dhex faafi karaa si aad u sahlan marmarka qaarkoodna wuxuu leeyahay astaamo yar ama waxbaba ma leh, oo ay kugu adkaaneyso inaad ogaatid inaad qabtid ka hor intaadan u gudbin dadka kale.

In kastoo caabuqa COVID-19 ee carruurtu uu badanaa ka fudud yahay ka dadka waa weyn, waxaa jira sababo xoog badan oo taageeraya in carruurta la tallaalo:

- Tallaaladu waxay siiyaan habka difaaca jirka ka caawineysa. Tallaalida ilmahaaga, waxaad caawineysaa inaad ka ilaalisid jiro daran oo ay ka qaadaan COVID-19 iyo saameyn ay suurtagal tahay wakhti dheer inay qaadato.
- Tallaalku wuxuu sidoo kale caawiyaa ilaalinta saaxibada, qoyska iyo bulshada, oo ay ku jiraan dadka nugul ee da'a kasta leh, adoo caawinaya in la yareeyo isugudbinta.
- Tallaalku wuxuu caawinayaa in carruurtu dugsiga dhigato oo ay ka qaybgalaan nashaadka bulshadeed ee muhiimka u ah koritaankooda iyo waxbarashadooda.

Malaayiin carruurta aduunka ah ayaa haddaba si amaan ah looga tallaalay COVID-19 haddaba. Caddeyntu waxay muujineysaa in tallaalku ka siinayo ilaalin wanaagsan jirro daran oo ah COVID-19 oo caawinayo inuu dhowro amaanka iyo caafimaadka qoyskaaga.

Carruurtu ma waxay qaadanayaan isku tallaal iyo qadaro sida dadka waaweyn?

Maya. Tallaalka la ogolaaday ee carruurta jirta 5-11 sanno loogu talagalay waa tallaal khaas ah Pfizer (Comirnaty) oo carruureed, oo ah laba cirbadood oo ay u dhaxeyso 8 toddobaad.

Qadarka tallaalka Pfizer ee carruurta jirta 5-11 sanno qiyaastii waa hal meel saddex meeloodkii inta la siiyo dadka jira 12 sanno iyo wixii ka sii weyn. Qadar ka yar ayaa loo isticmaalaa koox da'eedkan maadaama ay keeni karto ilaalin la mid ah oo heerkeedu sareeyo carruurta marka loo eego qadarka la siiyo dadka jira 12 sanno iyo wixii ka sii weyn.

Waxyeelada ay u leedahay carruurtu ma waxay la mid tahay ta dadka waaweyn?

Haa. Carruurtu waxay isku arki karaan isla waxyeelada la mid tan guud oo dadka waa weyni ka qaadaan tallaalka COVID-19.

Waxyeeladani guud ahaan waa kuwo fudud wayna baaba'aan maalin ama laba waxaana laga yaabaa inay ku jiraan:

- Madax xannuun
- Xumad iyo qabow
- Daal/daciifid
- Muruq xannuun iyo gacan xannuun ah goobta cirbada

Waxyeelada yari waa caadi waxayna muujineysaa in habka tallaalku uu u jawaabayo tallaalka. Waxyeelada aadka u daran ee tallaalka aad bay dhif u tahay, iyadoo khatarta isla waxyeeladaas isku mid ka ah ay aad uga sarayso markaad qaado COVID-19 laftigiisa. Haddii waxyeeladu ay sii jirto ama aad saluugsan tahay, la hadal GP-gaaga.

© NSW Ministry of Health December 2021

Waxyeelada khatarteedu daran tahay micnaheedu ma inaanan tallaalin ilmaheygaa?

Maya. Dhammaan tallaalada COVID-19 ee Austalia lagu isticmaalo waxay leeyihiin macluumaad amaan oo wanaagsan si xooggana waa loo baaray oo ay u qiimeysay Maamulka Badeecooyinka Daawada (TGA) iyo Kooxda Tallada farsamo ee Australia kala Talisa tallaalka(ATAGI) ka hor intaan la ogolaan oo aan lagu talin in la isticmaalo.

In ka badan 5 milyan oo caarruura ayaa Mareykanka (USA) dhexdiisa iyo malaayiin wax ka badan aduunka oo jira 5-11 sanno ayaa si amaan ah u qaatay tallaalka COVID-19 ilaa hadda.

Miyuu saameyn doonaa COVID-19 ilmaha kobiciisa, koritaankiisa ama dhalmadiisa mustaqbalka?

Maya. Ma jirto wax caddeyn ah oo tallaalka COVID-19 inuu saameynayo koboca iyo koritaanka ilmaha.

Saameynta wakhtiga dheer ee COVID-19 wuxuu ku yeelan karaa saameyn caafimaad iyo fiyoobaan. Khatarta dhibaatooyinka inaad qaado fayras ayaa ka sareysa badanaa waxyeelada fudud ee tallaalka.

Ilmaheyga ma in la tallaalaa haddii uu ku dhacay COVID-19 haddaba?

Haa. Carruurta uu ku dhacay COVID-19 waa inay qaataan tallaalka isla markay ka bogsoodaan jiradooda si uu uga caawiyo ugana ilaalyo inuusan ku dhicin caabuq kale.

Ilmaheyga ma la tallaali karaa ka raalli ahaanshaheyga la'aantiis?

Maya. Carruurta jirata 5-11 sanno waxay u baahan yihiin in masuul sharci ah ama waalid ay bixiyaan ka raalli ahaansho qaadashada tallaalka COVID-19.

Ka raalli ahaansho ayaa loo baahan yahay markaad ballansaneysid, iyo ballanka labaad. Haddii waalidka ama masuulka uusan la iman karin ballanta ilmaha, waxay soo magacaabi karaan qof kale oo weyn inuu la yimaado ballanta booskooda markaad buuxineysid ka raalli ahaanshaha online ka ah inta lagu jiro nidaamka ballansiga.

Faahfaahinta qofka weyn ee loo soo magacaabay inuu raaco waa in la bixiyaa inta lagu jiro ballanta si aqoonsigooda iyo ogolaanshaha inuu ka raalli noqdo qof ku metelaya oo la cadeyn karo maalinta ballanta..

Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan ka raalli ahaanshaha, booqo: Vaccination consent FAQs for parents and guardians (Ka raalli ahaanshaha tallaalka ee su'aalaha badanaa lays weydiiyo (FAQs) ee waalidiinta iyo masuuliyiinta loogu talagalay).

Tallaalka COVID-19 ma ku khasabaa carruurta (kuwaas on ay ku jiraan cayaaraha iyo dugsiga iwm)?

Maya. Tallaalka COVID-19 ma aha khasab, laakiinse aad ayaa loogu dhiirigelinayaa.

Ma jiraan wax looga baahan yahay carruurtu inay qaataan tallaalka COVID-19 si ay uga qaybgalaan dugsiga ama nashaadka cayaaraha bulshada.

Ilmahaygu ma qaadaan karaan tallaalka xoojinta ah?

Maya. Tallaalka ugu muhiimsan wuxuu sameynayaa jawaab tallaal oo xooggan dadka dhalinyarada.

ATAGI waxay tixgelin doontaa haddii qadarka xoojinta looga baahan yahay koox da'eedkan ee mustaqbalka,

Carruurta ma dugsigaa lagaga tallaalayaa COVID-19?

Maya. Uga ballami tallaalka COVID-19 ka ilmahaaga GP, farmasiga xaafada, Adeegga Caafimaadka Kontoroolan ee Bulshada Aboorijiinka ama rugta caafimaadka tallaalka NSW.

Sidee baan u ballansanaa?

Waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ballansadaan ballanta tallaalka ee ee carruurtooda sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

Hadda ka ballanso online - www.nsw.gov.au/covid-19/vaccination/get-vaccinated

Wac si aad u ballansato: Khadka taleefanka Ballamaha: 1800 57 11 55/ Adeega Turjumaada afka iyo Qoraalka ee (TIS): 131 450

© NSW Ministry of Health December 2021